

Shaqa-guryeedka Qoyska ee cutubka FLASH Lagu barto Dugsiga Sare

Mid ka mid ah yoolalka cutubka FLASH ayaa ah in la kordhiyo wada hadalka waalidka iyo dhalinyarada ee ku saabsan caafimaadka galmada. Cilmi baaris ayaa muujisay in dhalinyarada ay jeclaan lahaayeen inay waxbadan kala hadlaan arimahan waalidkood ama qof kale oo weyn oo lagu kalsoon yahay, iyo in wada hadaladani ay door muhiim ah ka ciyaaraan ka caawinta dhalinyarada inay ka hortagaan uurka, STDs (Cudurada Lagu kala qaado Galmada) iyo HIV. FLASH waxaa ka mid ah Shaqa-guryeedka Qoyska si looga dhigo wada-hadalkaan mid sahlan oo soo noqnoqda.

Cashar kasta oo FLASH ah wuxuu leeyahay su'aal-guriyeedka Qoyska ee ardayga iyo dadka waaweyn inay ka wada hadlaan. Waa fursad aad kaga hadasho mowduucyada ku jira FLASH isla markaana aad la wadaagto waxyaabaha aad aaminsan tahay, iyo waxa aad ka aaminsan tahay qoyskaaga ama dhaqankaaga. Macallimiintu ma weydiin doonaan wadahadallada Shaqada Guriga ee Qoyska. Shaqada Guriga Qoyska waa lagula talinayaa laakiin looma baahna. Ardaydu waxay ku dhammaysan karaan shaqa-guriyeed shaqsiyeed isla buundada ah.

Waad ku mahadsantahay waqtiga aad siisay inaad wax ka akhrisato Shaqa-guryeedka Qoyska. Waxaan rajeyneynaa inay kaa caawin doonto adiga iyo dhallintaada inaad wada hadalo qiimo leh yeelataan. Si loo dhammaystiro shaqa-guryeedka Qoyska, si fudud ugala hadal su'aasha casharka maalin kasta. Dadka waaweyni waa inay bilaabaan cashar kasta oo ay ka wada hadlayaan ilmahooda yar oo ay ku saxiixaan booska banaan ee hoos lagugu siiyay.

Saxiixa qaangaarka

Magaca ardayga

Su'aalaha Shaqa-guryeedka Qoyska ee Cutubka FLASH	Xarfaha hore ee dadka waaweyn
Lesson 1: Dejinta Cimilada Ma jirto wax su'aal ah oo laga waydiinayo casharka maanta. Fadlan akhri macluumaadka ku qoran boggan oo ku saabsan Shaqa-guryeedka Qoyska ee FLASH.	
Lesson 2: Nidaamka taranka Maxaad ugu maleyneysaa inay muhiim tahay in wax laga barto nidaamka taranka?	
Lesson 3: Uur Ma ka baratay wax ku saabsan uurka oo maanta kaa yaabiyay?	
Lesson 4: Hanuuninta Galmada & Aqoonsiga Jinsiga Maxay muhiim ugu tahay dadku inay ku faraxsanaadaan jinsigooda?	

Lesson 5: Fikradaha ku saleysan Jinsiga Maxay yihiin qaar ka mid ah fikradaha ku saleysan jinsiga ee aad u malaynayso inay waxyeello leeyihiin? Maxaan sameynaa si aan isugu dayno inaan beddelno?	
Lesson 6: Xiriirada Caafimaadka qaba Qeex xiriir aad aragtay ama aad meel ka akhrisatay. Waa maxay astaamaha xiriirka aad isleedahay waa mid caafimaad qaba, aan caafimaad qabin, ama leh calaamadaha digniinta xadgudubka?	
Lesson 7: Xoogid iyo Oggolaansho Maxaad ugu maleyneysaa inay muhiim tahay in markasta la helo oggolaansho marka la samaynayo xaalado galmo? Maxay tahay in qofku sameeyo haddii uusan hubin inuu haysto oggolaanshaha qofka kale?	
Lesson 8: Badqab Onlayn ah Maxaad labadiinuba horey uqabteen si aad amaan ugu ahaataan onlaynka? Sidee isu caawin kartaan si aad uga amaan ahaataan onlaynka?	
Lesson 9: Ka fogaanshaha galmada Sideed u aragtaa shukaansiga dhalinyarada? Goorma ayaad u malaynaysaa inuu qofku diyaar u yahay inuu galmo sameeyo?	
Lesson 10: Qaababka Ka Hortagga Dhalmada Sideed u aragtaa dadka isticmaalaya ka hortagga uurka si looga hortago uur qaadista?	
Lesson 11: Kahortago HIV iyo STDs (Cudurada lagu kala Qaado Galmada) kale Maxaad u malaynaysaa inuu qofku kala hadlo lammaanihiisa arrimaha ku saabsan STDs (Cudurada lagu kala Qaado Galmada) iyo HIV?	
Lesson 12: Kondhomyada Goorma ayaad u malaynaysaa inuu qof isticmaalo kondhom?	
Lesson 13: Baarista STDs (Cudurada lagu kala Qaado Galmada) iyo HIV Maxaad talo siin laheyd dhalinyarada ka walwalsan inay qabaan STD (Cudurada lagu kala Qaado Galmada) ama HIV? Tusaale ahaan, yaay u sheegaan, xageese u doontaan caawimaad?	
Lesson 14: Xiriirka iyo Go'aan Qaadashada Waa maxay noocyada waxyaabaha ay muhiim tahay in laga fikiro marka qof kale go'aan laga gaarayo?	